

# ALLA VINNER NÄR DU ÅTERVINNER!



**Markasta oo aad u keento baakad ama wargeys  
si dib loogu warshadeeyo, ayaa wax weyn uu  
dhacayaa.**

Furka dhalooyinka ee duuga ah/gaboobey ayaa loo rogi karaa biraha baabuurga laga sameeyo. Tusaale ahaan, baakadaa oomada ayaa waxay noqon doontaa kartoonka kabaha lagu ritto. Wargeyskii shalay ayaa noqon doona kii berritoole. Khayraadka dabiiciga ah ayaa mar labaad dib loo isticmaalayaa, iyadoo tamar badanna la badbaadinaayo. Sidaas ayaynu dhammaanteen iskaga caawinaynaa, sidii aan u abuuri laheyn dunnii fiican oo lagu noolaado.

## DIB U WARSHADEYNTA

Dhammaan baakooyinka iyo wargeesyada la soo ururiyo ayaa dib loogu geynaya dib u warshadeynta si ay u noqdaan baako iyo badeecoojin cusub. Baakadaha caaggu waxay noqdaan alaab ceyrin, oo tusaale ahaan laga sameeyo, burushka wax lagu dhaqo, dheriga ubaxa lagu riddo iyo bacaha balaastigga ah. Dhalooyinka iyo baakadaha warqaddaha ayaa caadi ahaan waxay noqdaan kuwo mar labaad baakad laga dhigo. Biraha waxa lagu rito ayaa noqon karta mid birta wax lagu xoojiyo iyadoo wargeesyada la akhristey ay noqon karaan warqadaha guri wax la iskaga masaxo ama warqad wargeyska laga sameeyo.

## MASUULIYADA SOO SAARAHAA

Dalka Iswiidan waxaanu leenahay masuuliyada soo saaraha. Taas waxay ka dhigan tahay in shirkadaha wax soo saara ama iibya baakooyinka iyo wargeesyada ayaa mas'uul ka ah in la soo ururiyo oo dib loo warshadeeyo. Anaga oo ah Baakeedada iyo Wargeyska kuwa soo ururiya, (Förpacknings- och Tidningsinsamlingen ama FTI), ayaa ka wakiil ah shirkadahaas. Wawaanu rabnaa inay adiga kuu sahlanaato inaad dib u warshadeyso iyadoo isla markaa faa'iidata ay u leedahay deegaanku ay noqoto ta ugu weyn. Laakiin waxaanu u baahanahay caawimadaada si aanu taas ugu guuleysano.

## XARUMAHA DIB U WARSHADEYNTA

FTI waxay mas'uul ka tahay dhammaan xarumaha dib u warshadeynta ee aan ciddi joogin ee ku yaala dhamaan Iswiidhan. Halkan waxaad aadi kartaa si aad uga geys joornaalada iyo baakadaha caag ah, warqadaha, biraha iyo dhalooyinka si dib loogu warshadeeyo. Haddii aad ku nooshahay guri leh meel lagu ururiyo wargeesyada iyo baakadaha ayaad halkaas geynaysaa.

## MACLUUMAAD DHEERAAD AH

Waxaad [www.ftiab.se/hitta-atervinningsstation](http://www.ftiab.se/hitta-atervinningsstation) ka fiirin kartaa xarunta dib u warshadeynta ee kuugu dhow iyadoo aad ka arki karto marka meesha laga qaadaayo ee la xaaqaayo. Halkaan waxaad ka heleysaa su'aalo ku saabsan hannaanka dib u warshadaynta, filim ku saabsan dib u warshadeynta, talo iyo tusaale iyo macluumaad ku saabsan waxqabadkayaga

Haddii aad qabto wax su'aalo ah oo ku saabsan iyo baakadaha, fadlan nagala soo xiriir [kontakt@ftiab.se](mailto:kontakt@ftiab.se) ama **+46 (0)200 88 03 11**. Su'aalaha ku saabsan qashinka waaweyn, qashinka digada/carrada laga dhigo, qashinka korontada ama arrimaha kale ee qashinka ku saabsan, fadlan la xiriir maamulka deegaankaaga ama wax dheeraad ah ka akhrii [www.sopor.nu](http://www.sopor.nu).

# Wax badan kala saar!

Si aanu sida ugu suurtogalka badan wax dib ugu warshadeyno ayaanu ugu baahanahay adiga caawimadaada. Baakadaha waa inay noqdaan qaar faaruqa oo sida ugu macquulsan ugu qalalan. Haddii aad haysatid baako ka sameysan maadado/waxyaboo badan, aaya waxaad ugu kala sooceysaa waxyabaha aad ugu maleynayo inay ugu badna yihin miisaan ahaan. **Mahadsanid!**



## CAAGA WAX LAGU SHUBTO

Tusaale: Dhalooyinka, gasacadaha, bacaha balaastigga ah, baakadaha dib wax loogu shubto, tuyuubyada caaga ah, bacaha jibiska iyo buushka/goomada.

- ✓ Ka fur furka iyo daboolka. Ku faaruqi bacdaada caaga wax lagu shubto weelka si ay si gooni ah ugu kala yaalaan. Waxay hadhow dhib yareynaya nidaamka u warshadeynta.
- ✗ Waxyabaha caagga ah ee aan aheyn baakadaha wax lagu ritto aaya loo dhigayaa qashin sida iyagoo ah qashin-waaweyn ama ka guriga, sida tusaale ahaan alaabta guriga iyo alaabta carruurtu ku ciyarto. Caagadaha dib loo celiyo aaya lacagta laga soo ceshanayaa tukaanka.



## WARAAQAH A WAX LAGU RITO

Tusaale: Baakadaha baastada, caanaha iyo casiirka, saladaha warqadaha, kartoomaa kabaha, warqada musqulaha iyo kartoomada warqadaha guryaha.

- ✓ Kala fidi oo isku laab laab. Ku rid baakado yaryar kuwa waaweyn si aad u badbaadiso boos.
- ✗ Bushqada warqada waxa lagu ridayaa qashinka guriga ama qashinka guban kara. Wargeesyada, wargeesyada xayeyiiska iyo wixii la mid ah aaya lagu ridayaa baaldiga wargeesyada.



## BIRAH A WAX LAGU RITO

Tusaale: Qasacadaha, daasadaha biifbaafka ee madhan, tuyuubyada/dhubooyinka yar yar, furarka, qufulada iyo gasacadaha rinjiga ee madhan.


- ✓ Isku laab daboolka fiiqan ee qasaacadaha. Furka ku daa tuubada.
- ✗ Daasadaha ay ku jiraan rinjiga iyo hadhaaga isbiirtadu aaya loo tuuraa sida qashinka halista ah. Qashinka birta, waxyalaha WVS-ka, daawayasha iyo waxyabaha kale ah ee aan aheyn baakad aaya laga tagay qashin sida iyagoo ah qashin-waaweyn ama ka guriga. Daasadaha dib loo celiyo aaya lacagta laga soo ceshanayaa tukaanka.



## DHALOOYINKA WAX LAGU SHUBTO

Tusaale: Dhalooyinka iyo daasadaha midabka leh ama bilaa midabka ah.

- ✓ Ka fur furka dhalada, daboolka iyo furka/gufka oo u kala sooc sida waxyalaha ay ka sameysan yihin. Kala sooc dhalooyinka midabka leh iyo kuwa aan midabka laheyn adigoo ku ridaaya weelka saxda ah.
- ✗ Dhalooyinka dib loo celiyo aaya lacagta laga soo ceshanayaa tukaanka. Weelka dhoobada ka samaysan iyo waxyabaha kale ah ee aan aheyn baakad aaya laga dhigayaa qashin sida iyagoo ah qashin-waaweyn ama ka guriga. Nalalka iyo laanbadaha/nalalka dhaadheer aaya badanaa la geynayaa xarumaha cidi joogto ee dib u warshadeynta degmadu leedahay.



## WARGEYSYADA

Tusaale: Wargeesyada maalinlaha iyo toddobaadlaha ah, joornaalada, tusmeeye/kaataloog, wargeesyada xayeyiiska, buug-yar, buugaagta khafiifka iyo warqada wax qorista/sawirida.

- ✓ Ka goo bacaha balaastiga ah iyo calaamadaha xabagta leh ee ku dhagan.
- ✗ Bushqada warqada iyo buugta tolan/isku-tolan waxa lagu ridayaa qashinka guriga ama qashinka guban kara. Warqadaha kiishashka, kartoonada iyo wixii la mid ah aaya lagu ridayaa baaldiga waraaqaha.